

Tababarka Xalalka waara oo loogu talagay Bulshooyinka uu Saameeyey Barakaca ee Somalia

Kulanka 3aad: Maxay yihiin qaabdhismeedyada sharci iyo siyaasadeed ee hoosta ka xariiqaya geeddi-socodka xalalka waara?

Soo koobid

Kulankani wuxuu ku saabsan yahay qaabdhismeedyada sharciyeed ee heer caalami iyo heer qaran ee hagaya raadinta xalalka waara. Marka, geeddi-socodka xalalka waara iyo wax-ka-qabadyada waxay ku saleysan yihiin xuquuqda, gaar ahaan xuquuqda aadanaha. Nidaamkan ku saleysan xuquuqda aadanaha ayaa xuddun u ah qeexida xalalka waara. Waxay ka dhigeysaa bulshooyinka uu saameyey barakaca,maadaama ay yihiin kuwa xuquuqda leh, inay udub dhexaad ka yihhin nidaamka xalalka waara. Mas'uuliyiinta qaranku waxay leeyihiin mas'uuliyad, maadaama ay yihiin xilal qaadayaal, inay ixtiraamaan, ilaaliyaan oo ay gutaan xuquuqdan ayna hubiyaan in bulshooyinka uu saameyey barakaca ay u helaan xal waara barakacooda. Kulankan waxaan ku baran doonnaa qeybaha kala duwan ee sharciga ee quseeya bulshooyinka uu saameyey barakaca: xuquuqul insaanka caalamiga ah iyo qaababka gaarka ah ee barokaca u gaarka ah iyo waliba sharciga iyo xeerarka siyaasadeed ee dhowaan laga soo saaray dalka Somalia.

Ujeedooyinka

Dhamaadka kulankan, ka qaybgalayaashu waxay awoodi doonaan inay:

- Qaado hab ku saleysan xuquuq markaad raadineyso xalalka waara.
- Soo bandhig qaabdhismeedka caalamiga ah ee muhiimka ah, oo ay ku jiraan sharciga xuquuqda aadanaha, oo hoosta ka xariiqaya xalal waara.
- Qeex oo isticmaal qaab-dhismeedka sharci iyo siyaasadeed ee qaran ee xukuma geeddi-socodka xalalka waara ee Soomaaliya
- Is-waafaji oo sawir isbarbar dhig u dhexeeya xalalka waara iyo Yoolalka Horumarka Waara iyo qorshooyinka horumarinta qaranka iyo waxqabadyada.

Fariimaha Muhimka ah

1. **Bulshooyinka uu saameyey barokaca ayaa ah kuwa xaq u leh oo raadinta xalalka waarana waxay ku saleysan yihiin xuquuqda aadanaha, sinnaanta iyo mabaadi'da takoor la'aanta.**
2. **Dastuurka Soomaaliya wuxuu ilaaliyaa oo uu horumariyaa xuquuqda aadanaha Soomaaliyana waxay qayb ka tahay inta badan xeerarka caalamiga ee xuquuqda aadanaha waxayna ansaxisay qaabdhismeedyada caalamiga ah ee u gaarka ah barakaca.**

3. **Soomaaliya waxay xeerarkeeda sharci ku dartay qodobo gaar u ah barakaca iyo shuruudo xalal waara iyadoo loo marayo siyaasado, sharciyo iyo istiraatiijiyado.**
4. **Xalalka waara waxay waafaqsan yihiin Yoolalka Horumarka Waara (SDGs) waxaana lagu dhex daray Qorshayaasha Horumarinta Qaranka Soomaaliyeed.**
5. **Hirgelinta shuruucda noocan oo kale ah ayaa fure u ah horumarka xagga xalalka waara ee bulshooyinka uu saameyey barakaca.**

Ogsoonow in qoraallada fududeynta iyo talooyinka iyo sidoo kale farriimaha muhiimka ah ku jiraan bog kasta oo ku jira sanduuqa qoraalka.

Habka Gudbinta Tababarka

Habdhismeedka

Kulankaan waxaa loo qaabeeyey illaa saddex qaybood oo waaweyn wuxuuna ku dhammaadaa hawl gaaban oo kama dambays ah oo ujeedadeedu tahay guud-mar waxyaabaha barashada waaweyn ee casharka.

1. **Habka ku saleysan xuquuqda aadanaha**. 20-ka daqiiqo ee ugu horeysa kulanka waa fursad lagu furdaamin karo fikradda ku saleysan xuquuqda aadanaha ee ku wajahan raadinta xalka iyadoo xoogga la saarayo sharciga xuquuqda aadanaha iyo takoor la'aanta. Farriinta ugu weyn ayaa ah in bulshooyinka uu saameyey barakaca ay yihiin kuwa xaq u leh oo mas'uuliyiinta qaranku ay mas'uul ka yihiin hubinta inay helaan xuquuqdooda aasaasiga ah ee aadanaha si horumar looga sameeyo dhinaca xalalka waara. Soomaaliya waxay ansaxisay inta badan heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha oo waxay dastuurkeeda iyo qaab-dhismeedyada gaarka u ah barakaca ee waddanku qaatay ku dartay qodobo xuquuqda aadanaha ah
2. **Qaabdhismeedyada sharciyeed ee caalamiga ah ee u gaarka ah Barakaca** Iyada oo loo marayo bogaggan iyo hawsha gaaban waxaan ku soo gabagabeyn doonnaa in Soomaaliya ay oggolaatay oo ay u gogol xaartay guda joog inay ka dhigto iyo hirgelinta inta badan qaanuunnada sharciga, caalamiga ah ee qaaska u ah barakaca, oo uu ku jiro Heshiiskii Kampala ee Barakaca Gudaha Afrika.
3. **Shuruucda iyo Siyaasadaha ku saabsan barakaca iyo xalalka waara ee Soomaaliya.** Soomaaliya waxay dhowaan sameysay oo qaadatay qaab sharci adag iyo siyaasadeed si loo hago loona raaco habka xalalka waara ee bulshooyinka uu saameyey barakaca. Qeybtaan kulanka waxay fursad siineysaa in la kala saaro qaanuunaada dhawaan la qaatay sida:
    - Siyaasadda Qaranka ee ku wajahan Qaxootiga-soo-noqda iyo Barakacayaasha gudaha
    - Tilmaamaha Deegaan Ka saarida Qaranka.

- Maamuuska kumeelgaarka ah ee ku saabsan Dhul uqaybinta guryeynta looguna deeqayo Qaxootiga soo noqday iyo barakacayaasha ee u qalma
- Istaraatiijiyadda Xalalka Waara ee Qaranka.
- Ku darista mudnaanta xalalka waara ee lagu darayo Qorshaha Horumarinta Qaranka.

Wakhtiga

Kulankaan waxaa loo qorsheeyay inuu socdo hal saac iyo bar

- Qiyaastii 20 daqiiqo qeybta 1
- Qiyaastii 20 daqiiqo qeybta 2
- Qiyaastii 30 daqiiqo qeybta 3
- Qiyaastii 20 daqiiqo ay qaadato hawsha ugu dambaysa

Hawlaha

II. Qaabdhismeedyada sharciyeed ee caalamiga ah ee u gaarka ah Barakaca

Hawsha 1aad: Isku-Qas oo Isku-Aadi. U qaybi qaababka qaaska u ah barakaca gaarka ah (doc: Casharka 3aad hwasha Isku-Qas oo Isku-aadi) iyo sharaxaadahooda koox walba baqshad. Hal baqshad koox kasta. Weydii ka qaybgalaha inuu isku-aadiyaan qaab-dhismeedka kasta iyo sharraxaaddiisa. Kooxda ugu hor dhammeysa ayaa guuleysataa. Si kooban u soo bandhig qaab-dhismeed kasta marka la gaaro is-xog-wareysiga dambe

III. Shuruucda iyo siyaasadaha ku saabsan barakaca Soomaaliya

Hawsha 2aad: U qoondee koox kasta hal ama laba shuruud oo waydii iyaga inay ku aadiyaan halbeeg kasta oo u dhigma kuna habboon:

- xuquuqda aadanaha ee ay u taagan yihiin
- SDG (yada) ay tilmaamayaan
- Tiirka Qorshaha Horumarinta Qaranka ee u dhigma
- Mudnaanta u dhiganta ee Istaraatiijiyadda Xalka Qaranka ee Waara

Weydii ka qaybgalayaasha in ay isticmaalaan muunad diyaarsan si ay ugu taxaan jawaabtooda (kulanka 3aad. Muunad hawsha ugu dambeeysa). U qaybi oo si kooban u soo koob jadwalka la dhammaystiray (M1. kulanka 3aad. Hawsha ugu dambeeysa shaxdeeda la dhammaystiray) oo ah is-xog-wareysi.

Diyaarinta

- ☐ Hawsha 1aad: Daabac oo ka jaro qaababka qaaska u ah barakac gaar ah ee caalamiga ah kulanka 3aad Hawsha Isku-Qaska iyo Isku-aadinta oo ku rid baqshadaha. Hal baqshad

koox kasta

- ☐ Hawsha 2aad: Daabac shaxda jadwalka hawsha (kulanka 3aad. Muunad hawleedka ugu dambeeya). Qiyaastii saddex nuqul koox kasta iyo shaxda la dhammaystiray, ka qaybgale kasta mid

Maqaalo Qoraal oo Faaido leh

- ☐ Qaanuunka Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha: https://www.ohchr.org/en/professionalinterest/pages/coreinstruments.aspx
- ☐ Heshiiskii 1951 ee Geneva ee la xiriiray Xaaladda Qaxootiga iyo maamuusyadiisii 1967: https://www.unhcr.org/about-us/background/4ec262df9/1951-convention-relating-status-refugees-its-1967-protocol.html
- ☐ Heshiiskii OAU ee 1969 ee Maamulayey Dhinacyada Gaarka ah ee Dhibaatooyinka Qaxootiga ee Afrika: https://www.unhcr.org/about-us/background/45dc1a682/oau-convention-governing-specific-aspects-refugee-problems-africa-adopted.html
- ☐ Mabaadi'da Hagaya ee Barakaca Gudaha: https://www.unhcr.org/protection/idps/43ce1cff2/guiding-principles-internal-displacement.html
- ☐ Heshiiskii Midowga Afrika ee Badbaadinta iyo Caawinta Barakacayaasha Qaaradda Afrika (Shirweynihii Kampala): https://www.unhcr.org/about-us/background/4ae9bede9/african-union-convention-protection-assistance-internally-displaced-persons.html
- ☐ Siyaasadda Qaranka ee ku saabsan Qaxootiga-soo-noqday iyo Barakacayaasha (IDPs): https://www.refworld.org/pdfid/5d8332c64.pdf
- ☐ Tilmaamaha Deegaan Ka saarida Qaranka: https://www.refworld.org/docid/5d8333ae4.htm
- ☐ Maamuuska kumeelgaar ah ee ku saabsan Dhul uqeybinta Guryeynta la siinayo Qaxootiga soo laabtay iyo Barakacayaasha u qalma https://www.refworld.org/pdfid/5d8331024.pdf
- ☐ Istaraatiijiyadda Xalalka Waara ee Qaranka
- ☐ Qorshaha Horumarinta Qaranka 9:http://mop.gov.so/wp-content/uploads/2019/12/NDP-9-2020-2024.pdf
- ☐ Horay u socoshada: Xal waara oo loo helo barakaca magaalooyinka Waaxd Dowlada Hoose ee Muqdisho Gobolka Banaadir Istaraatiijiyada Xalalka Waara. https://dsu.so/wp-content/uploads/2020/09/DSU_strategy_report_2020_v11.pdf